# Ilaha Xogta lagu taliyay ee Kooxaha IEP-ga Marka la Tixgeliyo Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19

Kahor intaan la go'aamin baahida jirta, iyo xaddiga, adeegyada ka bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelay, haddiiba ay jiraan, koox kasta oo IEP ka tirsan waa inay eegaan wadarta guud ee duruufaha arday kasta oo ay tixgeliyaan xogta laga helay ilaha kala duwan. Tani waxaa ka mid ah xog iyo macluumaad laga helo:

- Xogta Gundhiga ah ee COVID-19 Kahor (tus., sannad-dugsiyeedka 2019-20 ilaa Xiritaanka Dugsiga ee La Dheereeyay)
- Xiritaanka Dugsiga ee La Dheereeyay gudaha Maarso 2020 iyo Waxbarashada Fogaan-aragga ah ee Dadka oo Dhan,
- Waxbarashada Fog ee lagu dhigto Goobta, Isku-dhafka ah, iyo Dhammeystiran ee bilowga ilaa dhammaadka sannad-dugsiyeedka 2020-21, iyo
- Xogta soo ifbaxaysa kadib sannad-dugsiyeedka 2020-21.

Dib-u-eegista xogta ardayga waa in lagu saleeyaa xaqsoor. Waxaa muhiim ah in la tixgeliyo aragtiyo kala duwan marka la fasirayo xogta ardayga. Tusaale ahaan, tixgeli taageerooyinka waalidka iyo qoyska, dugsiga, iyo bulshada ay awoodeen inay siiyaan ilmaha maadaama xogta la uruuriyay, iyo saamayn kasta ay taageerada ku yeelan karto saxnaanta iyo isku halaynta xogta. Isku soo wada duuboo, kooxdu waa inay tixgelisaa in xogtu ay ka bixiso sawir buuxa kartida ardaygan, iyo waxyaabaha kale ee loo baahan yahay si loo dhammaystiro sawirka. Su'aalaha Hagista ee Macquulka ah ee loogu talagalay Kooxaha IEP-ga si ay u tixgeliyaan Adeegyada Ka Bogsashada COVID-19 ee La Gaar Yeelayayaa sidoo kale loo isticmaali karaa inayshaqadan udub dhexaad u noqoto mahadhada guud ee ardayga.

## XOGTA GUNDHIGA COVID-19 KAHOR

Isku keen oo dib-u-fiiri xogta laga bilaabo xiritaanka dugsiga kahor COVID-19 si loo dejiyo heera gundhiga ah ee horusocodka ardayga ee la xiriirta tacliinta, dabeecadda/dareenka bulsheed, wadaxiriirka, iyo xirfadaha waxqabashada. Xogtan gundhiga ah waa in loo adeegsadaa isbarbardhiga xirfadaha ardayga ee jira iyo waxqabadkiisa marka loo eego xirfadiisa iyo waxqabadkiisa kahor safmareenka COVID-19. Waxaa ku jiri kara balse kuma xaddidna:

- Heerka taariikheed ee barashada xirfadda ee ardayga; horusocodka laga gaaray hadafyada IEP-ga, halbeegyada, iyo ujeeddooyinka; tusaalooyinka shaqada; iyo isxigxiga dib-u-dhaca/soo kabashada kadib nasashooyinkii hore ee adeegga;
- Indha-indhaynta iyo xogta macalimiinta, daaweeyayaasha, waalidiinta, iyo dadka kale oo xiriirka tooska ah la leh ardayga;
- Macluumaadka baaritaanka, qiimeynta, ama imtaxaanka ee laga hayo ardayga;
- Qiimaynta qaabeysan iyo guud, qiimaynta manhajka ku salaysan, iyo xogta imtixaanka kahor iyo kadib; iyo
- Macluumaad kasta oo kale oo habboon oo ay bixiyeen waalidka, xubnaha kale ee kooxda IEP-ga, ama faylka guud ee ardayga.

## XIRITAANKA DUGSIGA EE LA DHEEREEYAY GUDAHA MAARSO 2020 IYO WAXBARASHADA FOGAAN-ARAGGA AH EE DADKA OO DHAN

Isku keen oo dib-u-eeg xogta kaqaybgalka ardayga ee Xiritaanka Dugsiga ee La Dheereeyay iyo Waxbarashada Fog ee Dadka Dhan ee Gu'ga 2020 ee COVID-19, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn:

- Indha-indhaynada, tusaalooyinka shaqada ardayga, diiwaanada dhaqanka, iyo baaritaannada iyo qiimaynnada aan rasmiga ahayn;
- Macluumaadka ka yimid bixiyeyaasha adeegga la xiriira (haddii lagu dabaqi karo);
- Xogta laga helay nidaamyada waxbarashada onlaynka ah ee la isticmaalay intii lagu jiray Waxbarashada Fogaan-aragga ah ee Dadka oo Dhan
- Diiwaannada xogeed ee qoyska, talada iyo indha-indhaynta waalidka ee la qoray iyo xogta aan cilmiga ku dhisneyn ee uu ku bixiyay waalidka kulanka IEP-ga;
- Xog kasta oo la socoshada horusocodka oo la heli karo ee ku saabsan hadafyada IEP-ga inta lagu jiro Waxbarashada Fogaan-aragga ah ee Dadka oo Dhan;
- Caqabado kasta oo hortaagan helitaanka ardayga inta lagu jiray Waxbarashada Fogaan-aragga ah ee Dadka oo Dhan;
- Xogta la xiriirta kaqaybgalka adeegyada Sannad-Dugsiyeedka La Dheereeyay (ESY); iyo
- Imaanshaha iyo kaqaybgalka ardayga inta lagu jiro Waxbarashada Fogaan-aragga ah ee Dadka oo Dhan.

## WAXBARASHADA FOG EE LAGU DHIGTO GOOBTA, ISKU-DHAFKA AH, IYO DHAMMEYSTIRAN EE BILOWGA ILAA DHAMMAADKA SANNAD-DUGSIYEEDKA 2020-21, IYO

Isku keen oo dib-u-eeg xogta kaqaybgalka ardayga ee Waxbarashada Fog ee Lagu Dhigto Goobta, Isku-Dhafka ah, iyo Dhammeystiran ee Bilowga Ilaa Dhammaadka Sannad-Dugsiyeedka 2020-21, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn:

- Xogta la socoshada horusocodka ee hadafyada IEP-ga;
- Macluumaadka ka yimid bixiyeyaasha adeegga la xiriira (haddii lagu dabaqi karo);
- Waxqabadka ardayga ee hawsha koorsada, oo ay ku jiraan buundooyinka;
- Xogta laga helay nidaamyada waxbarashada onlaynka ah ee la isticmaalay intii lagu jiray Waxbarashada Fog ee Dhammeystiran;
- Xogta la ururiyey inta lagu guda jiro Waxbaridda Fool-ka-foolka ah ee Xadiddan (LIPI);
- Caqabado kasta oo hortaagan helitaanka ardayga inta lagu jiray 2020-21;
- Imaanshaha iyo kaqaybgalka ardayga inta lagu jiro Waxbarashada Fog ee Dhammeystiran.

## XOGTA SOO IFBAXAYSA KADIB SANNAD-DUGSIYEEDKA 2020-21

Isku keen oo dib-u-eeg xogta cusub markay soo baxdo kadib sannad-dugsiyeedka 2020-21. Tixgeli cunsurka xogta oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn:

- Qiimaynta macallinka ee guusha ardayga ee loo adeegsaday waxqabadyada waxbarasho ee kala duwan;
- Indha-indhaynta tooska ah ee waxqabadka fasalka ee ardayga;
- Waxqabadka ardayga (tus.; xogta imtaxaanka kahor iyo imtaxaanka kadib, tusaalooyinka shaqada, diiwaanadda daaweynta);
- Xogta La Socoshada Horusocodka Ee Hadafyada IEP-ga;
- Halbeegyada, qiimeynada qaabeysan, iyo maaddooyinka;
- Diiwaanada cilmiga aan ku dhisneyn ee guriga/dugsiga; iyo
- Wareysiyada ardayga, markay habboon tahay.